

Ma kiro ayaad deganayd sannadkii hore? Codso lacag soo celinta loogu talagalay kirada aad bixiso!



Waxa laga yaabaa inaad u qalanto u soo celinta cashuurta haddii dakhliga
reerkaagu uu ka yar yahay \$73,270.

Maxaan u baahanahay si aan u codsado lacag soo celinta?

- Foomka M1PR oo dhammaystiran, Lacagta Soo Celinta Deganaanshaha Guriga (Homestead Credit Refund) (ee loogu talagalay mulkiilaha guriga) iyo Lacagta Soo Celinta Canshuurta Guriga Kiraystaha.
- Koobiga caddaynta kirada la bixiyay (CRP).
 - Mulkiilahaaga gurigu waa inuu ku siiyaa CRP ugu dambayn Janaayo 31, 2024.
 - Waxa aad heli doontaa hal CRP guri kasta oo aad kiraysato inta lagu jiro sannadka.
Xasuusin: Lacag celintaada dib ayaa loo dhigi karaa ama waa la diidi karaa haddii aadan ku soo darin CRPs.

Sidee ayaan u xaraystaa lacag soo celinta?

- **Si elektaroonik ah:** Isticmaal softiweerka cashuurta si aad u diyaariso ama soo dir Foomka M1PR. Kharashyada softiweerka ayaa laga yaabaa in lagugu soo dalaco.
- **Boostada:** Booqo www.revenue.state.mn.us si aad u soo dejisato oo aad u buuxiso Foomka M1PR. Ku soo dir boostada canshuur celintaada aad buuxisay iyo koobiyada dhammaan CRP-yada aad heshay.

Goorma ayaan u baahanahay inaan xareeyo?

Xareey Canshuur celinta Guriga Kiraystaha 2023 kahor inta aysan dhicin **Ogosto 15, 2025**.

Su'aalaha Caadiga ah ee Soo Celinta Canshuurta Guriga Kiraystaha

Maxaa dhacaya haddii aanan mulkiilahayga ka helin Shahaadada Kirada La Bixiyay (CRP) ugu dambayn Janaayo 31?

La xiriiir mulkiilahaaga ama maareeyaha guriga si CRP laguugu sameeyo.

Maxaa dhacaya haddii CRP-gayga uu ku qoranyahay macluumaad khaldan?

La xiriiir mulkiilahaaga ama maareeyaha guriga si loo saxo.

Maxaa dhacaya haddii mulkiilahaygu diido inuu bixiyo ama saxo CRP ama uu ka soo jawaabi waayo?

Haddii aadan haysan CRP ama wax sixid ah ugu dambayn Maarso 1, naga soo wac 651-296-3781 ama 1-800-652-9094. Waxaa laga yaabaa inaan kuu soo dirno warqad markhaati fur kirada la bixiyay ah si aad ugu isticmaasho bedelka CRP. Xaa-laddan oo kale, waxaad u baahan doontaa inaad ku xerayso Foomka M1PR boostada oo aad soo raacisid caddaynta bixinta kiradaada.

